Sawiro: kuvittajajuha.fi

Qaaxadu – maxay tahay?

- Qaaxadu waa cudur ay keento bagteeriyada Mycobacteriumtuberculosis.u
- Waxa ay u kala gudbi kartaa dadka dhexdiisa tiiyo hawada raacaysa.
- Inta badan qaaxadu waxa ay ku dhacdaa sambabada.
- Cudurku waxa uu ku dhigci kara xubnaha kale ee jidhka sida qanjidhada, midhicirada, lafaha ama maskaxda.

FILHA 1907

Maculuumaad dheerada ka akhriso

tuberkuloosi.fi

Hengitysliitto

Waa sidee calaamadaha xanuunka qaaxadu?

Qaaxada sambada calaamadaha inta badan la arko:
- Qufac dhawr todobaad socda
- Xaaku soo go'da ama la tufo
- Dhiig xaakada soo raaca

Calaamado kale:
- Xummad (qandho)
- Dhidid fara badan oo habeenkii ah
- Miisaanka oo hoos u dhaca daal
- Nafsada cuntada oo hoos u dhacda
- Cafimaadka qofka oo hoos u dhaca

Calaamadaha waxay noqon karaan noocyo kale sida, taas oo ku xidhan xubinta jidhka ee ay ku dhacdo qaaxadu.

Carruurta calaamdaha ugu badani waa degenaansho la'aan, oohin, qofka oo is dhiiba, cunto xumo, koritaanka oo hoos u dhaca. Dadka waaweyn calaamadahoodu tartiib tartiib ayay u soo baxaan.

Sidee qaaxadu loo kala qaadaa?

Qaaxadu waxa ay ku gudubtaa tiiyoo hawada raacaysa. Intabadan waxa ay ka soo gudubtaa qofka qaba qaaxada sambabka. Marka qofka cudurka qabaa qufaco ama hadlo ayey bagteeriyada qaaxadu hawada raacdaa. Bagteeriyadu waxa ay hawada ku jiri kartaa dhawr saacadood. Dadka ku wada nool goob muddo dheer (qolka dugusiga, guriga, goob shaqo, gaadhi dhexdiis), waxa ay neefsan karaan bagteeriyadii oo sambabkooda u gudbi karta oo sidaas ay cudurka ku qaadi karaan.

Qaaxada si dhibyar laguma qaadi karo. Qayb ka mida dadka cudurka la kulmay ayuun baa qaadaysa. Tirada ugu badan ee qaadaa waa dadka guri ku wada nool.

Hawada oo guriga loo furaa waxa ay yaraysaa bagteeriyada qolka ku jirta. Debeda waxa khatara oo lagu kala qaadi karaa ma jirto. Cudruka laguma kala qaado weelka, cabidda, cuntada la wadaago, dharka ama alaabta guriga dushooda, sidoo kale dhunkashada, laabta oo la isku qabo ama galmoodka

Yaa u bukoon kara?

Marka qofka uu cudurku u soo gudbo, bagteeriyadu waxa ay ku jirtaa sambabkiisa. Haddii bagteeriyadu ay gash xaalada aanay faafin, qofku uma bukoodo, wax calaamad ahna ma laha, xanuunkuna ma fidinaayo (waa qaaxada dahsoon). Haddii bagteeriyadu ay noqoto mid firifircoon way tarrmaysaa, qofkuna wuxu u bukoonayaa cudurka qaaxada. Qofkaas waxa uu inta badan yeelanayaa calaamdaha qaaxada. Isla cudurku waxa uu u gudbi karaa dadka kale.

- Sadexdii qofk hal qof oo ka mida dadka qaaxada la kulma ayaa qaadu lagu arkay in uu la kulamay.
- Tobankiiba hal qof oo ah dadka cudurka la kulmay ayaa u bukooda qaaxada.
- Daka ugu nugul in ay cudurka qaadaan waa caruurta 5 sano ka yar, dhallinyarada, dadka aad u da'da weyn iyo dadka awoodda difaaca jidhkoodu hooseeyo.

Dadka da'doodu ka yartahay 5 sano ee aan qaaxada laga tallaalin waxa ay u bukoon karaan qaaxada dhawr todobaad ka dib am bil ka dib marka ay qaaxada la kulmaan xanuunkuna muddo yar ayuu ku fidi karaa. Dadka waaweyn badh ayaa bukoon kara muddo dhawr sannadood gudhahooda, marka aya cudurka la kulmaan ka dib. Waxa kaloo dhici karta in loo bukoodo illaaa toban sanadood ka dib marka cudurka lala kulmo.

Sidee lagu caddeyn karaa cudurka qaaxada?

Marka laga shakiyo in qaaxada sambabadu ay jirto waxa la sameeya raajatada sambada waxa kale oo la baadhaa xaakada qofka. Marka qaaxada laga baadhayo xubnaha kale ee aan samabdka ahayn waxa habab kala duwan shaybaadh lagu sameeyaa dheecaanada laga soo qaaday xubanahaas. Badhitaanku wuxu ka bilaabmaa Bukaan Socodka. Haddii loo baahdo badhitaanno dambe waxa ay ka dhici doonaan isbitaalka.

Qaaxada ma ka bogsan karaa?

Haa qaaxada waxa bogsiin karta daawaynta. Daawada ayaa baabiinaysa bagteeriyada qaaxada. Dawaaynta waxa laguugu bilaabayaa isbitaalka iyagoo ka kooban 4–5 daawo. Muddada daawadu soconayso waa ugu yaraan sannad badhkii. Baadhitaanka, daawooyinka, jiifsiga isbitaalka, xiidhka iyo dabagalka bukaanka waxa ay u tahay qofka bukaanka ah lacag la,aan.

Waxa muhiim ah in dhammaan daawoyinka sida lagugula taliyo loo qaato muddoda daawaynta oo dhan. Haddii daawada dhakhso loo joojiyo xanuunku wuu soo noqon karaa haddii daawada la googooyo, bateeriyadau waxay daawada u yeelan kartaa adkaysi. Qaaxada daawada adkaysiga u lehi aad ayay u adagtahay in la daaweeyo waxa ay qaadan kartaa 1.5–2 sanadood.

Waa laga bogsan karaa qaaxada haddii cudurka laga bogsado oo daawaduna ku dhamaato waqtiga loogu tala galay.

Yuu tallaalka qaaxadu wax u badbaadinayaa?

Tallaalka BCG (Bacillus Calmette-Guerin) waxu si fiican u badbaadin rkaraa caruurta naaska jaqaysa iyo caruurta yaryar oo ay ka ilaaliso in uu ku dhaco noocyada adag ee qaaxadu.

Sannadkii 2006 laga bilaabo waxa la tallaalay carruurta 7 jir ka yar oo qudha kuwaas oo si gaara khatar ugu jira in ay qaadaan cudurka qaaxada. Iyaga waxa tallaalka la siiyo isla marka ay dhashaan ka dib. Tallaalku waa lacag la'aan. Tallaalku dadka waawayn waxtar badan um laha, dadka waawayna lama tallaalo.

Maxaa looga jeeda dabagalka dadka la nool qofka qaba qaaxada?

Dadka la nool qofka qaaxada qaba waxa dhici karta in cudurku uu u soo gudbay ama xannuunka qaadeenba. Sababtaas ayaa loo waraystaa, qofka buka si loo ogaado dadka uu meel kula noolaa.

Dadka la noolaa qofka buka waxa ballan looga sameeya buakaan-socodka halkaas oo badhitaan loogu sameeyo. Carruurta waxa lagu baadhaa isbitaalka. Haddii baadhitaanka lagu ogaado in qofku buko waxa loo bilaabaa daawada. Dadak loo malaynaayo in ay la kulmeen cudurka qaaxada waxa la siiyaa daawooyin ka hortaga. Qaar ka mida dadka qof qaaxao qaba la kulmayna waxa lala socdaa muddo 1–2 sannadood ah. Haddii muddadaas laga helo calaamado u eeg qaaxada waxa isla markiiba lagu baadhi karaa bukaan socodka.

Dabagalka qofka la kulmay cudurka waxa lagaga hortegi karaa fiditaanka cudurka. Waxa tilmaamaya xeerka cudurada faafa. Sababta oo ah cid u nugul cudurka waxa loo samaynayaa badhitaan iyo daawayn lacag la'aan.

Ha ku quficin dadka hortooda. Haddii aad qufacdid afkaaga iyo sankaaga masar ku qabo ama ku qufac oo u dhig jintaada.